

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD



ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

SANADKA 23^{AAD}

CADADKA 7^{AAD}

TAARIIKH: 27/07/23

Lam. 01

FAAFINTA RASMIGA AH

OFFICIAL GAZETTE

الجريدة الرسمية

SHARCIGA MAGACA GOBOLKA RAAS CASEYR

TUSMADA

Qeybta 1^{aad}	<i>Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah</i> Sharciga Magaca Gobolka Raas Casey
Qeybta 2^{aad}	<i>Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 3^{aad}	<i>Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha</i> <i>Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 4^{aad}	<i>Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 5^{aad}	<i>Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.</i> WAXBA MALEH



DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA



ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Sharci Lr. 01 ee 26-ka Luulyo 2023, kuna saabsan Magaca Gobolka Raas Caseyr.

Madaxweynaha Dowladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80^{aad} farqadiisa 16^{aad} iyo Qodobka 64^{aad}.

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/40/2022, kuna taariikhaysan 20^{ka} July 2023.

Wuxuu soo saaray

Sharciga soo socda:

Qodobka 1^{aad}

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Magaca Gobolka Raas Caseyr


Qodobka 2^{aad}

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinaayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

Qodobka 3^{aad}

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

Siciid Cabdullaahi Deni
Siciid Cabdullaahi Deni
Madaxweynaha Dawladda Puntland



DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILADA



ولاية بونت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

Tix:- XGGW/DPL/40/2023 Garoowe, Talaada, **Taariikh:-** 20/07/2023

Ku:- Madaxweynaha Dawladda Puntland

Garoowe

Ujeeddo:- ANSIXINTA MAGACA GOBOLKA RAAS CASEYR

GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU:

MARKUU ARKAY:-

Dastuurka DPL Qodobka 64-aad.

MARKUU ARKAY:-

Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada DPL
Qodobkiisa 3-aad.

MARKUU ARKAY:-

Qodobka 21-aad ee Xeerka Maamulka
Gobollada, Degmooyinka iyo Dhismaha
Golayaasha Deegaanka Dawladda Puntland.

MARKUU ARKAY:-

Soo gudbinta Madaxweynaha Ref:
MW/DPS/104/2023 ee Luuliyo/03/2023 kuna
Saabsan ansixin magac cusub ee Gobolka
Gardafuu.

MARKUU DHEGAYSTEY:-

Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 52-aad,
fadhigiisa 14-aad ee 20/07/2023 ku oggolaadeen
magac bedelka cusub ee Gobolka Gardafu,
Guntanka fadhiga oo ahaa (46) Mudane, waxaa
ugu codeeyey oggol bedelka Gobolka Gardafu oo
bedelay Gobolka Raas Caseyn (44) Mudane,
Diidmo (2) Mudane, halka aysan jirin cid ka
aamustay.

WUXUU GUDDOOMIYEY:-

Ansixininta Magaca Gobolka Raas Caseyr

Wada Shaqayn Wacan

Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.



